















# DOAVISA

DOAVISA WAA WARGEYS-DERBIYEED KA HADLAYA JIDHKA, SHUCUURTA, GALMADA IYO EDBINTA, KUWAAS OO AH, MOWDUUCYO XIISO LEH OO DAD BADANI U ARKI KARAAN WAX LAGA XISHOODO IN LAGA HADLO. DAABCAADDAN DOAVISA WAXAY KU SAABSAN TAHAY DHAQAALAHA. AKHRIS WACAN!

<p><b>Mushahar qaado</b></p>  <p>Mushahar. Norway waxaa caadi ah in bishii hal mar la helo mushaarka. Si kastaba, iyada oo aan loo eegin in aad qaadato mushahar go'an ama mid saacadle ah, waxaad macluumaadka ku saabsan lacagta aad shaqaysatay, saacadaha aad shaqaysay, mushaharka fasaxa iyo cashuuraha aad bixisay ka helaya warqadda mushaharka ee aad ka hesho loo-shaqeeyahaaga. Xusuusnow inaad bil kasta fiiriso oo habsatid warqadda mushaarka. <b>NOK 20.000</b></p>	<p><b>WARQADDA MUSHAHARKA</b></p>  <p><b>NOK 20.000</b></p>	<p><b>BOORSADA LACAGTA</b></p>  <p>Waa fikrad wanaagsan in la furo akoon bangi wadajir ah oo qof walba uu ku shubi karo qayb ka mid ah mushaarkiisa bil kasta, si loogu isticmaalo kharashaadka sida guriga, cuntada, gaadiidka iyo waxyaabo kale. Miisaaniyadda qoyska waa in loo qaybiyaa saddex qaybood, 50% - waxa loogu talagay kharashka guriga, cuntada iyo xannaanada carruurta, 30% - madadaalada, ciyaaraha iyo fasaxyada. Inta soo hadhay oo ah 20% waxay noqonaysaa kayd</p> <p><b>NOK 45.000</b></p>	<p><b>BIILASHA</b></p>  <p>Waxaa fiican in la sameeyo lacag bixin toos ah (avtalegiro iyo akoon bangi oo gooni ah biilasha ka yimaada degmada. Markaa lacagta ayaa si toos ah u baxaysa wakhtiga saxda ah. Iska ilaali inaad la daahdo bixinta lacagahan oo kale, haddii kale waxaa ku kordhi doona kharashyo badan oo dheeraad ah oo ka imanaya shirkadaha dayn ururinta.</p> <p><b>NOK 5.000</b></p>	<p><b>U kaydso oo u isticmaal si xikmad leh</b></p> 
<p><b>GUURITAANKA IYO DHAQITAANKA</b></p>  <p>Dhammaad. Hambalyo, gurigaaga cusub! Ha ilaabin inaad iibsatid caymis, guuritaanka qorshee maalinta ka horreysa oo salaan deriska cusub.</p> <p><b>NOK 1.500</b></p>	<p><b>Bolig og privatøkonomi</b></p> 			<p><b>SHABAGGA ADEEGA</b></p>  <p>Eeg ababka ka mid yihiin Mattilbud iyo eTilbudsavis si aad u ogaato in ay jiraan qiimo-dhimis lagu sameeyay dukaamada cuntada ee kala duwan ee kuu dhow. Waxa kale oo fiicnaan karta in la isticmaalo kaararka abaalmarinta (Coop, Trumf) iyo kuubannada qiimo dhimista. Iskaa ilaali inaad maalin kasta in yar soo iibsatid, laakiin todobaadkiiba 1-2 jeer ka soo adeego dukaanka adiga oo wata liiska alaabta aad rabtid.</p> <p><b>NOK 4.000</b></p>
<p><b>BSU</b></p>  <p>Bangigaagu waxa uu kuu furi karaa kaydka guryaha ee dhalinyarada (BSU), kaas oo laga helo cashuur-dhaaf iyo dulsaar fiican. Haddii aad ka yar tahay 34 sano, waxaa wanaagsan inaad raasamaal ku kaydsato akoon BSU ah ka hor intaadan guri iibsaa.</p> <p><b>NOK 3.400</b></p>				<p><b>KAYDINTA</b></p>  <p>Kaydinta. Lacag go'an bil kasta u qoondee inaad ku shubtid akoonka kaydka. Go'aanso waxa aad rabtid inaad lacag u kaysatid, tusaale ahaan inaad urursatid qadar lacag ah ama waxyaabo aad rabto inaad iibsato.</p> <p><b>NOK 3.500</b></p>
<p><b>RAASAMAAL AH 15% QIIMAHA GURIGA</b></p>  <p>Maalgelinta. Si aad u hesho deyn guri, sida caadiga ah waa inaad haysataa raasamaal - iibsashada guriga ugu horreeya waxaa la rabaa 15% wadarta lacagta deynta ah. Haddii ay kugu adag tahay inaad kaydsato raasamaal, waxaa ku caawin kara amaahda bilowga ah ee Bangiga Guryaynta (Husbanken) iyo deeq degmada laga helo. La hadal bangigaaga si aad u heshid faahfaahinta inta aad amaahan karto.</p> <p><b>NOK 150.000</b></p>				<p><b>MASTERCARD GOLD</b></p>  <p>Ka taxaddar isticmaalka kaarka deynta madaama ay tahay deyn caadi ah oo ay tahay in dib loo celiyo. Kaararka deyntu inta badan waxay leeyihiin dulsaar badan, markaa iska ilaali inaad la daahdo bixinta lacagta, isla markaana kaliya u isticmaal arrimaha lagama maarmaanka ah oo kaliya.</p> <p><b>NOK 25.000</b></p>
<p><b>ISKAASHATO GURI</b></p>  <p>Haddii aad saami ka iibsato iskaashato guri ama guri saamiyeed, waxaad gurigaaga ka noqonaysaa mulkiile aan toos ahayn oo xubin ka ah iskaashata guryaha. Uma baahnid inaad ka fikirto bixinta kharashka waxyaabo ay ka mid yihiin isticmaalka biyaha ama gurista barafka.</p> <p><b>NOK 1.800.000</b></p>				<p><b>MULKIILE XOR AH</b></p>  <p>Norway waxaa ka jira qaabab kala duwan oo guriga loo lahaan karo. Mulkiile xor ah waxay ka dhigan tahay inaad leedahay awood badan u leedahay maamulka dhismahaaga/hantidaada. Badanaa wuu ka qaalisan yahay, laakiin waxaa kaa yaraanaya kharashyada guud.</p> <p><b>NOK 3.500.000</b></p>